

Dhexdexaadaha dhaqanka Hussain ee SGGG

Digniin: qoraalkani wuxuu waxkaqabanayaa rabshadaha galmaada iyo jinsiga la xidhiidha.

Hussain wuxuu qeyb muhiima ka ahaa kooxda ilaa yo bilowgii mashruuca SAMEN. Isagoo ay weheliyaan afar iyo tobant hexdexaadie dhaqan oo kale, oo loo yaqaan shakhsiyadka muhiimka ah, Hussain wuxuu ka caawiyya soo galaytiga cusub inay helaan caawimada saxda ah. Hexdexaadayaasha dhaqanku waxay meesha ka saaraan caqabadahe helitaanka daryeelka caafimaad ee kuhaboon ka badbaadayaasha galmo iyo rabshada la xidhiidha jinsiga. Wareysigani lala yeeshay Hussain, waxaan ku weydiinay dhiirigalintiisa, khibradihiisa, iyo taladiisa uu siinayo xirfladlayaasha kale.



Hussain iyo kooxda kale ee SAMEN intii lagu jiray tababarka bilowga SAMEN.

Ma sharxi kartaa naftaada?

"Magacaygu waa Hussain waxaan ahay dhakhtar cilmi-nafsi oo kasoo jeeda Afgaanistaan. Waaan usoo guuray Netherlands saddex sano kahor. Waaan u shaqeeynaayey 15 sano tababare ahaan, daryeel-bixiye gaar ah, iyo turjumaan goobo kala duwan ah oo Afgaanistaan dhexdeeda ah. Waaan imika uga shaqeeyaa hexdexaadie dhaqan ahaan mashruuca SAMEN ee Rotterdam."

Maxaad u noqotay hexdexaadie dhaqan?

"Waaan ahay muhaajir aniga laftaydu oo intii lagu jiray nidaamka magan-galyo doonka waxaan waajahay caqabado badan. Waaan arkaa in muhaajiriinta kale waajahaan caqabado lamid ah. Dad badan ayaa leh uur-ku-taalo ama dhibaatooyin kale oo cilmi-nafsi laakiin la tacaala inay helaan caawimo



Co-funded by
the European Union

iyadoo sababtu tahay kala duwanaanshaha dhaqan. Iyadoo ay iigu wacan tahay khibrdaydu, waxaan aamisanahay inaan caaiwn karo musaafiriinta kale. Taasi waa sababta aan u go'aansaday inaan u noqdo dhexdhexaadiye Doctors of the World.

Xaalado nooce ah ayaad kala kulantaa shaqadaada dhexdhexaadiye dhaqan ahaan?

"Shaqaadaya waxaan la kulmaa muhaajiriin badan oo la tacaalaya caqabado dhovr ah. Marka koobaad, nidaamka magan-galyo doonka, oo leh hubanti-la'aan quutal daruuriga iyo mustaqbal, wuxuu noqon karaa warwar dhalije weyn. Hubanti-la'aantani waxay sababaysaa dawakhaad, cabsi iyo niyadjab. Muhaajiriin badan oo kasoo baxsaday goobaha dagaalka iyo khilaafka ayaa leh uur-ku-taaloojin soo baxaya kaliya marka ay degaan Netherlands. Waa intaas dheer, kalnimada, ka fogaanshaha dhaqankooda, ka fogaanshaha xubnaha qoyskooda iyo kuwa ay jeclaayeen, ayaa sidoo kale sababta isku-buuq. Si ay ula tacaalaan isku-buuqan, dad badan ayaa yeesha caadooyin aan caafimaadka u fiicney. Waxay bilaabaan qijinta iyo cabitaanka khamriga si ay ula tacaalaan shucuuraha xunxun. Waaarkay kooxo badan oo rag yaryar ah oo markii hore bilaabay qijinta marmar si ay u dareemaan fiicnaan, taasoo noqotay caado kharash iyo khatar badan. Madaamoo qijinta badanka loo arko dajiye isku-buuq, dadku badanka waxay bilaabaan qijinta markay waajahaan isku-buuq iyaga laftoodu."

Waxaan sawiran karaa taas dhexdhedaadiye dhaqan ahaan, waxaad ka maqashaa sheekoojin badan muhaajiriinta kale. Miyey jirtaa sheeko kaa yaabisay?

"Sheekada gabadh reer Afgaanistaan ah. Waxaan kula kulmay hoy. Waxa la i sheegay inay ka cabanaysay weeraro argagax ah oo aanu qofna caawin karin waayo waxay ku hadashaa kaliya Faarisi. Waxay lahayd dhowr uur-ku-taalo sababtoo waxay waajahday xadgudub galmo iyo rabshado gude yaraanteedii. Iyadoo sababtu tahay liisaska sugitaanka ee dhaadheer, may heli karin wax caawimo ah mustaqbalka dhow. Dhexdhexaadiye dhaqan ahaan, waxaan u dhageystay si naxariis leh waxaanan siiyey caawimo shucuureed. Waxaan ku xidhay dad kale oo ay la xidhiidhi karto oo ka caawiyeey inay ka qeybqaadato hawlaho bulshada si aanay u dareemin cidlo badan. Tani waxay sidoo kale ka caawisay inay hesho kalsooni badan. Anagoo marayna Stichting MANO (Rotterdam) waxaanu helnay mutadawiciin ka caawiyeey inay barato luuqada Dutch oo ay wax ka barato dhaqanka Dutch-ka. Wuxaan sidoo kale ka caawiyeey inay si fican ula xidhiidho dhakhtarkeeda oo ay hesho dhakhtar GGZ cilmi-nafsi. Dhammaan hawlahani waxay ka caawiyeen inay si fican dareento kadib dhowr bilood. Weerarada argagaxeedu way istaageen, shucuurteeda ayaa soo ficanatay, dhibaatooyinkeedii jidheed ayaa baaba'ay oo way madaxbanaanaatay."

Taasi waa caawimo qiimo badan. Ma ii sharxi kartaa farqiga u dhaxeeya dhexdhexaadiye dhaqan iyo shaqaale caawiye ah xaaladan oo kale?

"Xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ee Dutch waxay la kulmaan noocy dhaqamo kala duwan ah. Waa shaqo aad u caqabad badan in la maareeyo noocyadaasi kala duwan marka la joogo daryeelka caafimaadka. Caqabadaha luuqada ayaa sidoo kale carqaladayn kara daryeelka. Inkastoo ku hadalka luuqadu caawiso, lahaanshaha xidhiidh kalsooni ku saleysan ayaa daruuri ah. Dhedhexaadiyayaasha dhaqanku waxay ka ciyaraan doon muhiim ah xalinta cabaqadan, iyagoo hubinaaya fahamka luuqada iyo dhaqanka ee labada dhan. Dhedhexaadiye dhaqan ahaan, uma baahnid inaad xalisid dhibaatooyinka adiga laftaadu; waxaad noqonaysaa biriish ku xidha dadka haayada caawimada kuhaboon haya. Waxa muhiim ah inaad ogaatid inay jiraan haayado badan oo loo tixgaliyo. Kaliya haayadu diirada ma saaraan caawimada cilmi-nafsi ee xirfada, balse sidoo kale haayadu waxay diirada

saaraan caawimada sharci, barashada luuqada, kaalmada maaliyadeed, iyo hawlaha jimicsiga iyo ciyaaraha, haayadaha dhaqanka, iyo hawlaha xirfada iyo mutadawacnimada. Waxaan u gudbiyey dadka haayado kala duwan, oo ay kujiraan xarunta bulshada, dawlada-hoose, adeegyada caafimaadka dadweynaha, laamaha caafimaadka dhimirka, iyo kuwo kale."

Waa maxay taladaada aad siinaysid xirfadlayaasha kale?

"Hunbi inaad garanaysid waxa dhibaatooyinka caafimaad ee ugu badan ee ka dhex jira muhaajiriintu yihiin. Ka warhay halkasoo jeedaa iyo waxay soo mareen, laakiin sidoo kale ka warhay iskanecbaanshaaga dhaqamada kale. Tusaale ahaan, waxa muhiim ah inaad iska ilaalisid fikradaha ku saleysan muuqaalka ama asalka dhaqanka. Waxa sidoo kale muhiim ah inaad ka warhaysid in garashada soo galaytiga cusub ee caafimaadka maskaxdoodu kala duwanaan karo. Sidaasi darteed, bar-bilowgu waa sidaasi darteed inaad bixisid macluumaad ku saabsan waxa daryeelka caafimaadka iyo daryeelka Netherlands yahay. Sidoo kale isticmaal dhexdhixaadiyayaal dhaqan ama shakhsiyad muhiim ah. Waxay leeyihiin aqoon badan waxaanay sameyn karaan isbaddel dhaqan iyo luuqadeed. Waxa jira qalab badan oo xog-ogagaal ah oo kaa caawinaya inaad balaadhsid aqoontaada."



Co-funded by
the European Union